



Soo bandhigida
Manhajka Barashada
Muhiimka ah ee
reer Fiktooriya

Macluumaad muhiima oo loogu
talagalay waalidka kuna saabsan
habka cusub ee barashada ardada iyo
manhajyada dugsiyada Fiktooriya



Manhajka Barashada Muhiimka ah ee Fiktooriya wuxuu siinayaa hab cusub oo ah manhajka ardada dhigata dugsiyada Fiktooriya bareeb ilaa sanadka 10aad. Manhajkaasi wuxuu muujinayaa waxa muhiimka u ah ardada inay bartaan oo horay u mariyaan waqtigay dugsiya ku jiraan. Waxa loogu talagalay in lagu dhiirigeliyo fahmid qota dheer oo aqoonta lagama maarmaanka ah, xirfadaha iyo dabecada. Manhajka waxa kaloo loo isticmaalayaa in lagu qorsheeyo barashada ardada, lagu qiimeeyo horumarka ardada looguna warbixiyo waalidiinta.

Waxaa la sameeyey manhaj ka dib cilmi baaris qaran iyo mid caalami ah oo ay samaysay Hay'ada Qiimaynta Manhajka Fiktooriya. Wada hadal ayaa lala sameeyey barayaasha reer Fiktooriya wada-tashina waxaa lala yeeshay kooxaha waxbarashada iyo bulshada guud. Kuwaas waxaa ku jiray dad ka socdey kooxaha waalidiinta ee qaybaha dawlad goboleedka iyo magaala weynta. Hay'ada Qiimaynta Manhajka Fiktooriya waxaa soo gaaray in ka badan 1000 jawaabood iyo u riyaaqid qayb ka ah wadatashigaan.

Baahida loo qabo hab cusub

Baahida dadka dhalinta yari waa isbedelaysaa. Fiktooriya waxay leedahay dugsiya wanaagsan, barnaamijya iyo barayaal fiican, laakiin waa muhiim in la sii wado in la sahamiyo sida ardadu wax u barato iyo waxa ay u baahan yihiin si ay u noqdaan kuwa ku guulaysta waxbarashada.

Manhajka waxa u jeedadiisu tahay inuu wax ka qabto loolanka iyo u diyaarinta dhalinyarada adduun aqoonta aad loo qiimeeyo, adduun shaqada, bulshada, dadweynaha iyo cilaacaadka shakhsiyeed oo u qoolan (ama ay tahay inay u hogaansanaadaan) cadaadis weyn oo soo adkaanaya.

Dadka dhalinta yari waxay u baahan yihiin aqoon aad u ballaaran iyo xirfado feker, bulsho, shakhsiyeed si ay ku guulaystaan. Manhajkaas waxbarasho ayaa u suurtagelinaya dadka dhalinta yar inay isu diyaariyaan sanadahooda ugu dambeeya ee barashada:

- Shahaadada Waxbarashada ee Fiktooriya (Victorian Certificate of Education)
- Shahaadada Fiktooriya ee Dhaqangelinta Barashada [Victorian Certificate of Applying Learning (VCAL)]

Barnaamijyada Tababarka iyo Waxbarashada Mihnadeed (VET) ayaa iyana waxaa lagu fulin karaa iyadoo qayb ka ah Shahaadada Waxbarashada Fiktooriya iyo Victorian Certificate of Applying Learning (VCAL)

Maxaa sidoodii sii ahaanaya? Maxaase is bedelaya?

Ardadu waxay sii wadi doonaan kor u qaadida iyo fahmida maadooyinka guud sida Ingiriiska, Sayniska, Xisaabaadka, Cilmiga bulshada, Luqadaha iyo Farshaxanka. Si kasta ha ahaatee, habkaan cusubi wuxuu si dhow ugu xirayaa maadooyinka guud kuwa kale oo muhiima oo barashada wixii gacanta laga qabanayo, mid shakhsiyeed iyo horumarinta xirfada bulsho iyo awooda ama kartida loogu dabakhayo aqoontaas nololaha runta ah. Iyadoo qayb ka ah habkaan cusub manhajyo ayaa iyana lagu daray sida dhisida cilaacaadyo bulsho, horumarinta xirfada fekerida iyo wada-hadalka.





Saddexda heer ee barashada

Manhajyada Barashada Muhiimka ah ee Fiktooriya. Waxay yihiin:

- Aqoonta iyo fahamka maadooyinka Ingiriiska, Sayniska, Xisabaadka, Aqoonta bulshada, Luqadaha iyo Farshaxanka
- Xirfadaha shakhsiyeed, bulsho iyo kuwa gacanta sida firfircoonaanta iyo fayobida, yeelashada isku kalsoonida, maaraynta barashada shakhsiyeed iyo la shaqaynta kuwa kale
- Xirfadaha kale ee muhiimka ah ee lagu dabaqayo ama salaynayo manhajka guud sida fekerida, naqshada, xalinta mas'alada ama su'aasha, wada-xiriirka iyo isticmaalida macluumaadka iyo farsamada wada-xiriirka ama wada-hadalka.

Kuwaan oo dhama muhiim ayay u yihiin koritaanka dadka dhalinyarada ah oo isku dubaridan iskuna kalsoon. Waxay joogta qayb uga ahaayeen waaya-aragnimada dadka dhalinta yar ee dugsiga, laakiin badanaa kuma xirnayn maadooyinka guud. In la isu keenaa waxay adkaynaysaa qiimahooda iyo sida ay muhiimka ugu tahay barashada ardada.

Heerarka ilaa Waqti la Sameeyey

Fiktooriya dugsiyadeedu waxay lahaayeen manhaj iyo heerar qiimayneed sanado badan. Waxaa jirta aragti xoogan oo ah wixii laga bari lahaa dugsiyada muddooyin inuu ka dhigay barnaamijka mid isku cakiran. Manhajka waxbarasho oo cusubi wuxuu siinayaa dugsiyada waqti fiican oo ay kaga fekeraan mudnaanaha kala duwan iyadoo ku xiran da'da ilmaha iyo heerkooda waxbarasho.

Heerka cusubi wuxuu aqoonsanayaa waxa muhiimka u ah ardada inay ogaadaan ayna awoodaan markay dhex mushaaxayaan heerarka kala duwan oo waxbarashadooda. Manhajyada waxbarasho si soo kordhaysa ayey u soo adkaanayaan markay ku sii durkaan dhamaadka sanada 10aad.

Manhajyada waxbarasho oo cusub, Sanadaha Hore (bareebka ilaa sanadka 4aad) waxaa joogta culayska loo saari doonaa akhriska farta iyo tirada. Intaas waxaa wehelisa, waxaa jira culays la saari doono caafimaadka, cayaaraha iyo korinta xiriirka u dhexeeya shakhsiyadka.

Markay ardadu ku jiraan dugsiga hoose, maadooyin siyaada ah oo heerka saddexaad ah ayaa loogu darayaa barnaamijka ardada, sida sayniska, macluumaadka iyo teknolajiyada wada-xiriirka, arrimaha madaniga iyo muwaadinimada. Marka kuwaan cusub lagu daro,



waxaa sii socon doonaa waxyaallaha muhiimka ah ee ku saabsan akhriska farta iyo xisaabta ama tirada oo la sii xoojin doona lana wanaajin doono.

Dhamaadka dugsiga hoose Manhajka Waxbarashada Muhiimka ah ee Fiktooriya ayaa bixin doona buundada loogu gudbayo dugsiga sarre. Manhajku wuxuu siinayaa asaas adag oo ardada u sameeya talaabo wax ku oolla oo looga gudbayo dugsiga hoose ilaa dugsiga sarre. Barayaasha dugisga hoose iyo kuwa dugsiga sarre ayaa sii wadi doona inay yeeshaan asaas guud oo lagu wado hadlo wixii ku saabsan xoojinta iyo loolanka ilma walba.

Dugsiga sarre, manhajyada waxbarashadu waxay ahaan doonaan kuwa laga soo guuriyo heerarka saddexaad sawirna ka bixinaya baahida barashada



ardada ee waxbarashadooda waqtigaan. Sanadaha 9aadka iyo 10aadka manhajka waxbarashadu wuxuu aqoonsanayaa in ardadu ay yeeshaan madaxbanaani weyn oo maskaxeed iyo kalgacal waxayna si qota dheer u doonayaan xiriirka ka dhexeeya barashadooda iyo dhabooyinka mustaqbilkooda.

Goormaa tani dhacaysaa?

- Manhajyada isa soo taraya ayaa loogu darayaa dhamaan dugsiyada Fiktooriya laga bilaabo Janaayo 2006 iyadoo lagu bilaabay Ingiriis iyo Xisaab. Inta lagu jiro 2005, dhamaan dugsiyada waxaa ka bilaabanaya hab cusub oo barashada lagu xiriirinayo barnaamijyadooda manhajka waxayna bilaabaya isbedel si loo xaqiijiyo inay awoodaan in barnaamijyadu jiraan si loo bixiyo manhajyada.
- Marka dugsiyadu si isa soo taraysaa u qaataan manhajka cusub waxay baari doonaan mabaadiida barashada iyo barida waxayna wanaajin doonaan dariiqooyinka qiimaynta iyo warbixinta. Hay'ada Qiimaynta Manhajka Fiktooriya iyo wasaarada Waxbarashada iyo Tababarida ayaa sii wadi doona inay siiyaan macluumaad dugsiyada iyo waalidka inta lagu jiro xilliga hirgelinta Manhajka.

Sidee ku heli kartaa macluumaad intaas ka badan?

- Booqo websaytka Heerarka waxbarashada oo ah <http://vels.vcaa.vic.edu.au>
- Wac Hay'ada Qiimaynta Manhajka Fiktooriya tel: (03) 9651 4544 ama 1800 134 197 (dad ka soo wacaya meel ka baxsan Magaalaweynta).
- Wixii ku saabsan macluumaadka Qorshaha Manhajka Dugsiyada Dawlada booqo www.sofweb.vic.edu.au/blueprint/
- La xiriir dugsiyada ilmahaaga.

Sidee uga qaybgeli kartaa?

- Weydii golaha dugsiyada ama maamulaha dugsiyada wixii ku saabsan sida dugsiyada ku caawimayo isbedelkaan muhiimka ah.
- Weydii dugsiyada waxa isla sidii ahaanaya iyo waxa isbedelaha manhajka dartiis.
- Ka qaybgal fadhiga macluumaadka wixii ku saabsan Manhajyada Barashada Muhiimka ah ee Fiktooriya, weydii su'aallo doorna ka qaado.

Tani waxay u tahay fursad wanaagsan dhamaantiin in aan diirada saaro dadka dhalinta yar iyo siday wax u baran lahaayeen.

© VCAA 2005

Published by

VICTORIAN CURRICULUM AND ASSESSMENT AUTHORITY

41 St Andrews Place East Melbourne Victoria 3002 Australia

TELEPHONE +61 3 9651 4300 FACSIMILE +61 3 9651 4324

EMAIL vcaa@edumail.vic.gov.au

WEB www.vcaa.vic.edu.au

